



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000

Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

Ku Dhawaaqidda Maamulaha Cusub ee Kellogg, Richard Smith

Janaayo 2021

Bulshada PPS ee Sharafta leh,

Waxaan ku faraxsanahay in Richard L. Smith, oo ah hoggaamiye waxbarasho oo guulo hore gaaray, uu noqon doono maamulaha Dugsiga Dhexe ee Kellogg marka dib loo furo dayta 2021.

Kellogg wuxuu ka furmi doonaa kadib laba sano oo dhisime dib-u-casriyeyn buuxdaa ka socotay isla goobtii Southeast Portland ee la xiray 2006. Dhismaha qaddiimka ah, oo qaybo kamid ah la dhisay 1913, ayaa la burburijey 2018, dugsiga cusubna wuxuu ka ciyaari doonaa door wayn hayaanka joogtada ah ee dugsi dhexe oo dhammaystiran oo degmadu leedahay.

Richard wuxuu ugu wareegi doonaa shaqada cusub si dhakhso ah si uu u hoggaamiyo dib-u-furidda. Wuxuu kasoo wareegi doonaa Lent K-8, halkaasi oo uu ka soo ahaa maamule ka badan laba sano.

Lent markuu joogay, Richard wuxuu la wareegay dugsi la hagran jiray wuxuuna sare u qaaday imaanshaha, dhaqanka dugsiga iyo inayna shaqaaluhu ka tagin. Wuxuu yareeyey dhacdooyinka anshaxmarinta, oo ay kujiraan hakinaha 60% iyo gabi ahaan gudbinaha 75%, kuwaasi oo ay fure u ahaayeen soo rogidda dhaqano jugta carruurta la kulmaan la ogaanayo iyo kordhinta ku lug lahaanshaha waalidka.

Richard wuxuu yimi PPS isagoo ka yimi Degmo Dugsiyeedka Houston Independent ee Texas, halkaasi oo uu ku guulaystay abaalmarinta Achieve 180 Principal of the Year Award kadib markii uu ku hagay Dugsiga Dhexe ee Edison horumar ah xagga buundda mooralka, imaanshaha, anshaxa iyo halbeegga ah. Abaalmarintu waxay ka mid ahayd abaalmarinaha kala duwan ee uu kasbaday wakhtigiisii intii uu ka ahaa maamule Houston.

Richard wuxuu mihnaddiisa ku bilaabay macallin xisaabta iyo Isbaanishka dhiga isagoo ka shaqayn jiray Alternative Learning Center West oo ku taala Cypress-Fairbanks ISD ee Texas, kadibna wuxuu ka noqday macallin xisaabta dhiga Dugsiga Sare ee Cypress Ranch ee degmadaas.

Richard wuxuu ka helay Digriiga Koowaad ee Waxbarashada Xisaabta oo u ahayd meejar, iyo maaynarkiisa oo ahaa Waxbarashada Isbaanishka, Jaamacadda Brigham Young-Idaho, wuxuuna ka qaatay Digriiga Labaad ee Waxbarashada Jaamacadda Houston.

Fadlan igu soo biir si aynu ugu hambalyeyno Richard shaqadiisa cusub.

Shawn Bird, Ed.D.
Madaxa Dugsiyada



Richard Smith

Portland Public Schools recognizes the diversity and worth of all individuals and groups and their roles in society. It is the policy of the Portland Public Schools Board of Education that there will be no discrimination or harassment of individuals or groups on the grounds of age, color, creed, disability, marital status, national origin, race, religion, sex or sexual orientation in any educational programs, activities or employment.